

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA NOOTAAYAHA & LATALINTA
ARRIMAHA SHARCIGA EE TAYO
MUQDISHO - SOOMAALIYA



جمهورية الصومال الفدرالية
مكتب تيو لتوثيق العقود
والإستشارات الشرعية
مقديشوا - الصومال



XEERKA DHISMAHA
(MADARASADA DAAR AL-HUDA)



MUQDISHO-SOOMAALIYA

2025

UJEEDO:- DHISID SHARCIGA MADARASADA DAAR AL-HUDA

Maanta oo ay taariikhdu tahay **04/09/2025**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/Ilaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha, Galbeedna Ka Xiga Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa ii yimid Marwoyinka hoos ku Xusan:-

1- SULEQO ABDULLAHI OSMAN, Somali ah, ina Lul ifaf Weheluye Ku Dhashay Baladweyne Sanadkii 1973, Lehna Somali Pass.l.r.P01543122 Ahna Gudoomiyaha Madarasada.

2-FARHIO MOHAMED RAGE, Somali ah, ina Hawo Hassan Muse Ku Dhashay Muqdisho Sanadkii 1975, Lehna Identity Card27505024454443 Ahna Gudoomiye Ku Xigeenka Madarasada.

3-FADUMO YUSUF ABDULLAHI AHMED, Somali ah, Farhio Kalif Abdullahi Ku Dhashay Buloburte Sanadkii 1993, Lehna Somali Pass.l.r.P01580619 Ahna Xoghayaha Madarasada.

Marwooyinkaan kor ku xusan iyago oo caafimaad qaba, caqligooda taam yahay, cid heshiiskaan ku qasabtayna aysan jirin qowl iyo ficilba, Waxay i weediisteyn inaan u qoro heshiis ku saabsan dhismo sharci oo ka kooban qodobada hoos ku qoran:-

QODOBKA 1-AAD

**MAGACA IYO ASTAANTA MADARASADA
MAGACA MADARASADA WAA MADARASADA DAAR AL-HUDA**



QODOBKA 2-AAD

WAQTIGA LA AASAASAY MADARASADA

MADARASADA DAAR AL-HUDA, Waxaa La Aas'aasay 02 November 2019, Waxaana Lagu Aas'aasay Magaalada Muqdisho Ee Dalka Soomaaliya.

QODOBKA 3-AAD

XARUNTA MADARASADA

Xarunta **MADARASADA DAAR AL-HUDA**, Waa Magaalada Muqdisho Ee Dalka Soomaaliya, Waxayna Xafiisyo Iyo Laamo Ku Yeelan Kartaa Dhammaan Dalka Gudahiisa Iyo Dibaddiisaba.

QODOBKA 4-AAD

NOOCA MADARASADA.

Madarasada Waa Madaraso Samiley Xadidan ay Lee Yihiin Shaqadeedu tahay Baridda Qur'aanka Tafsiirka Qur'aanka, Axaadiista iyo Siirada Si Bilaash ah.

QODOBKA 5-AAD
UJEEEDADA MADARASADA

Ujeeddada Madarasada Waa:

- Barashada Qur'aanka Kariimka
- Tafsiirka Qur'aanka Kariimka
- Barashada Axaadiista
- Barashada Siirada Nabiga CSW, iyo Axaadiista

QODOBKA 6-AAD
HANAAN XISAABEEDKA MADARASADA

Ka Hor inta aysan Madarasadu Howgalin, Waa in ay Xisaab Socoto (Current Account) Ka Furto Bankiyada & Hay'adaha Maaliyadda Ee Lagama Maarmaanka u ah Howgalka Madarasada.

QODOBKA 7-AAD
MAAMULKA MADARASADA

Gudoomiyaha **MADARASADA DAAR AL-HUDA** Waa SULEQO ABDULLAHI OSMAN, Gudoomiye Ku Xigeenka Madarasada waa FARHIO MOHAMED RAGE, Xoghayaha Madarasada Waa FADUMO YUSUF ABDULLAHI AHMED, Waxayna Dhamaantooda Awood Buuxda uu Lee Yihiin in ay Maamulaan **MADARASADA DAAR AL-HUDA**, Sida in ay Lacag Ku Shubi Karaan, Kana Saari Karaan Bankiyada Dalka iyo Dibadaba, Saxiixi Karaan Jeegaga Madarasada, Rahana galin Karaan Hantida Madarasada, kana Saari Karaan, una Soo gadi karaan, una Soo iibin karaan Madarasada Hantida Maguurtada iyo Guurtada Sida Dhulalka, Guryaha, Iwm, Lana Geli Karaan Heshiisyo iyo Macaamilaad Hay'ado Kheyri ah Oo Dowliga ah iyo Kuwo aan Dowliga aheynba Oo ay Dani ugu Jirto Madarasada.

QODOBKA 8-AAD
GUDOOMINTA SHIRARKA

Shirarka Kala Duwan Ee Madarasada, Waxaa Shir Gudoominaya Gudoomiyaha Madarasada, Haddii ay Maqan tahay Waxaa Shirarka Gudoominaya Gudoomiye Ku Xigeenka Madarasada Haddii La Waayo labadooda Waxaa Shir Gudoominaya Xoghayaha Madarasada.

QODOBKA 9-AAD
HABKA MAAMULKA XISAABAADKA MADARASADA

Madarasada Waxay Yeelanaysaa Nidaam Xisaabeed Oo Cid Walba Ka Bogan Karto Kuna Qotoma Nidaamka Caalamiga Ah Oo uu ay Soo Saarayso Gudoomiyaha Madarasada.

QODOBKA 10- AAD
MUDADA JIRITAANKA MADARASADA.

MADARASADA DAAR AL-HUDA Waa Madarasad Bulsho Oo Ka Shaqeysa Danguud, Sidaas Awgeed Jiritaankeeda Waxaa Xeerinaya Waxtarkeeda.

QODOBKA 11- AAD
BAABI'IDDA MADARASADA

Madarasada Waxay Ku Baabi'i Kartaa Marka Ay Timaado Xaladaha Hoos Ku Xusan:-

1. Jirintaanka Madarasada Daar Al-Huda Waxa ay Ku Xiran Tahay Waxtarkeeda.
2. Haddii ay Dhacdo ama Timaado Xaalad ay Ku kala Tagaan Asaasayaasha Madarasada Daar Al-Huda, Oo is Wadajir ah ku Go'aansadan Baabi'inta Madarasada.
3. Haddii Uu Soo Baxo Sharci Baabi'iniya Madarasada Nuucan Ah.

QODOBKA 12-AAD
MABAADII'DA MADARASADA

Madarasada Waxaa aas aas u ah in eey Ku Hoowlgasho Qodobadaan Soo Socda:-

- Cadaalad
- Is aaminaad
- Isla Xisaabtan
- Musuuliyad

QODOBKA 13-AAD
WAXYAABAHA AAN LAGU XUSIN XEERKAN

Dhammaan waxaa aan lagu sheegin xeerkan waxaa loola noqonaya sharciga islaamka qeybta mucaamalaadka iyo Madarasooyinka, sidoo kale qawaaniinta dalka u degsan.

- F.g wixii shareecada islaamka ka hor imaanaya waa waxba kama jiraan.

QODOBKA 14-AAD
ISTICMAALIDDA MAGACA MADARASADA

Magaca Madarasada Ayaa Loo Isticmaalayaa Dhammaan Hantida Madarasada Sida: Guryaha, Dhulalka, Gaadiidka, Bank Account, Heshiisyadda, Tiimbarayaasha Iwm.

QODOBKA 15-AAD

Madarasada Daar Al -Huda Waxa ay Fulinta Waajibkeeda u Kaashan Kartaa Mutadawiciin Khubaro iyo La Taaliyaal Kala Shaqeeya Fududeynta Hirgalinta Shaqada Guud Ee Madarasada.

QODOBKA 16

XEERKAAN WUXUU KA KOOBAN YAHAY
15 QODOB 1 COVER , 4 BOG IYO 2 NUQUL OO ORJINAAL IYO KOOBI AH.

SAXIIXA MILKIILAHA

SULEQO ABDULLAHI OSMAN "Ahna Gudoomiyaha"

FARHIO MOHAMED RAGE "Ahna G/Ku Xigeen"

FADUMO YUSUF ABDULLAHI AHMED "Ahna Xoghaye"

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP.1798/T.P.N/25, Tr. 04/09/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- Dr. Maxamed C/Ilaahi Maxamed "Max'ed Notaayo", Waxaan Sugayaa In Saxiixa Kor Ku Xusan Ay Yihiin Saxiixii Runta Ahaa Waxaan Halkan Ku Caddeynayaa In Xeerkaan Madarasada Ee Kor Ku Xusan Uu Yahay Mid Sax Ah Oo Waafaqsan Shareecada Islaamka Iyo Shuruucda Madaniga Ah Ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Islamarkaana ay Saxiixayn Gudoomiyaha & Gudoomiye Ku Xiigeenka Madarasada iyo Xubin Ka Mid ah Madarasada, Nootaayaduna Waxey Hubisay Magacyadaas In Uu Yahay Kii Dhabta Ahaa Ee Lahaayeen Saxiixa Kor Ku Xusan, Waxaana Lagu Qoray Diiwaanka Guud Ee Nootaayada.

NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/Ilaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"





Articles of Association-AOA

XEERKA DHISMAHA

MADARASADA DAAR AL-HUDA

MOGDISHO -SOMALIYA



2023





Ref No: XNB/B5/2756/2023.

TR: 22/05/2023

XEERKA ASAASKA MADARASADA DAAR AL-HUDA

Maanta oo ay taariikhdu tahay 22/05/2023, Aniga oo ah **Dr. Liban Osman Adan**, leh xafiiska Nootayada Beder, waxaa Beder Notary hor yimid dadka ay faahfaahintoodu xagga hoose ku xusan tahay, waxa ay I weydiisteen in aan u qoro Dastuurka **MADARASADA DAAR AL-HUDA**.

SN	MAGACA	JAGADA
1.	Nasra Farah Mohamed	Gudoomiye
2.	Farhio Mohamed Rage	Gudoomiye ku xigeen

QODOBKA 1AAD
Magaca Madarasada

Magacu waa **MADARASADA DAAR AL-HUDA**, oo shaqadeedu tahay baridda Quraanka, Tafsiirka Quraanka, Axaadiista iyo Siirada si bilaash ah.

QODOBKA 2AAD
Waqtiga la' aasaasay Madarasada

MADARASADA DAAR AL-HUDA; waxa lagu asaasay magaalada Muqdisho 02-November-2019.

QODOBKA 3AAD
Waqtiga jiritaanka Madarasada

MADARASADA DAAR AL-HUDA waa madarasad bulsho oo ka shaqeysa Danguud, sidaas awgeed Jiritaankeeda waxa xeerinaya Waxtarkeeda (Utilita Pubbli)

QODOBKA 4AAD
Xarunta Madarasada

Xarunta **MADARASADA DAAR AL-HUDA** waa magaalada Muqdisho, Madarasadu waxa ay Xarumo ka furan karaa dalka gudahiisa iyo dibaddiisa.

QODOBKA 5AAD
Ujeedooyinka Madarasada

- 1) Barashada Qur'aanka kariimka.
- 2) Tasxiixa Qur'aanka Kariimka.
- 3) Tafsiirka Qur'aanka kariimka.
- 4) Barashada Siirada Nabiga CSW, iyo Axaadiista.

QODOBKA 6AAD
Hannaan-Xisaabedka Madarasada

1. Ka hor inta aysan Madarasadu howgelin, waa in ay xisaab socota (current account) ka furto Bankiyada & hay'adaha maaliyadda ee lagama maarmaanka u ah howgalka madarasada.

QODOBKA 7AAD
Baabi'idda Madarasada

- 1) Jiritaanka **MADARASADA DAAR AL-HUDA** waxa ay ku xiran yahay Waxtarkeeda (Utilita Pubbli) si waafaqsan XMS.
- 2) Haddii ay dhacdo ama timaaddo xaalad ay ku kula tagadaan asaasayaasha **MADARASADA DAAR AL-HUDA**; waxa ay dhammaan hantida iyo Macluumaadka ay hayso ku wareejinaysaa hay'ad kale oo Danguud oo la nuuc ah **MADARASADA DAAR AL-HUDA**
- 3) Haddii Asaasayaasha Madarasadu si wada jir ah u go'aansadaan baabi'inta madarasada

+252 615-631-079
+252 610-444-544

✉ Bedernotary@gmail.com





QODOBKA 8AAD

MADARASADA DAAR AL-HUDA; waxa ay fulinta waajibkeeda u kaashan kartaa Mutadawiciin, Khubaro iyo la taliyeyaal kala shaqeeya fududeynta hirgelinta shaqada guud ee madarasada.


SN	MAGACA	AQOONSIGA	SAXIIXA
1.	Nasra Farah Mohamed	405317- Kasoo baxay dowladda hoose ee Muqdisho	
2.	Farhio Mohamed Rage	27505024454443- Kasoo baxay Hay'ada socdaalka iyo jinsiyadda Soomaaliya	

SUGITAANKA NOOTAAYADA

Aniga oo ah : **Dr. Liban Osman Adan**, lehna Xafiiska Nootaayaha Beder waxa aan halkan ku caddeynayaa in Qoraalka Aasaasidda (**MADARASADA DAAR AL-HUDA**) ee kor ku xusan uu yahay mid sax ah si waafaqsan Shareecada Islaamka iyo XMS, Qoraalka Aasaasidda madarasada waxaa lagu qoray diwaanka guud ee Nootaayada.



QOORGAAB





DOWLADDA HOOSE EE MUQDISHO
MUNICIPALITY OF MOGADISHU
WARQADDA SUGNAANTA
Certificate of Identity Confirmation

DUQA MAGAALADA MUQDISHO WUXUU CADEYNAYAA IN SAWIRKA IYO SUUL SAARIDDA HOOS KU TILMAAMAN UU YAHAY QOOFKA HOOS KU XUSAN:
(The Mayor of Mogadishu hereby certifies that the person whose picture and thumb print appears below has the following details.)

MAGACA Full Name	NASRA FARAH MOHAMED
TAARIKHDA DHALASHADA Date of Birth	13-06-1996
GOOFTA DHALASHADA Place of Birth	MOGADISHU
NUMBERKA KAARKA AQOONSIGA ID number	405717
JENSI Gender	Female
XAALADDA GURKA Marital Status	Single
DEGGAN Address	Wadajir
MAGACA HOYADA Mother's full Name	ABSHIRO HASSAN SHAKUL
TAARIKHDA LA BIXIYAY Date of Issue	15-May-2023
SHAQADA Occupation	GURI JOOQTO



Right Thumb Print

Duqa Magaalada ee Muqdisho
Mayor of Mogadishu
Yuusuf Xuseen Jimcaale





JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA


جمهورية الصومال

SOMALI REPUBLIC
WARAQADDA AQQONSIGA

بطاقة الهوية
IDENTITY CARD



Qaranka/الجنسية (National ID)
27505024454443



Magaca/الاسم / Name
FARHIO
MOHAMED RAGE

Taariikhda dhalashada/الميلاد / Birth
MOGADISHU

Taariikhda la bixiyay/الاصدار / Issue
MOGADISHU

Taariikhda uu dhacayo/الانتهاء / Expiry
08 Mar 2028

Lab / Dheddig / الجنس / Gender
FEMALE

JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA


جمهورية الصومال

SOMALI REPUBLIC
WARAQADDA AQOONSIGA

بطاقة الهوية
IDENTITY CARD

L. Qaranka/الهوية رقم/National ID

27505024454443



Magaca/الاسم/Name

FARHIO

MOHAMED RAGE



Taariikhda dhalashada/الميلاد/Birth

02 May 1975

MOGADISHU

Taariikhda la bixiyay/الاصدار/Issue

09 Mar 2023

MOGADISHU

Taariikhda uu dhacayo/الانتهاء/Expiry

08 Mar 2028

Lab/Dheddig/الجنس/Gender

FEMALE




FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 04/09/2025

Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **MADARASADA DAARU AL HUDA** Dukumiintiga **Original** Heshiiska **Rep No. 1798/T.P.N/25, Tr. 04/09/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca Dhinaca 2aad	MADARASADA DAARU AL HUDA
Taariikhda Heshiiska	04/09/2025

Dhinaca 2aad: Aniga oo ah **MADARASADA DAARU AL HUDA**, Leh Tel No. **061 5865262**, Degan **MUQDISHO** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Heshiiska faah faahintiisu Sare ku cadahay.



SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Maxamed Cabdi Cali

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

MADARASADA DAARU AL HUDA